## 7-605 Baadhista Kiimikada - Xadgudubyada Wadista

(10/05/01) (08/21/03) (09/26/16)

(A-B)

**A.** Marka la xidhayo qof kaxaynaya/wadaya gaadhiga isagoo ku sakhraansan khamri ama daroogo, ama lala tacaalayo xadhiga muwaadin loo xirayo wadista marka saamaynta sakhraanku jiro, sarkaalka xariga samaynaya waa in uu tuhmanaha u kaxeeyaa Qaybta Baadhista Kiimikada iyo in Hawlwadeenka DMT-G-gu (Qalabka lagu cabbiro heerka sakhraanku gaarsiisan yahay) tuhmanaha u soo bandhigaa baadhista neefsiga. (11/08/16)

1. Eedaysanaha wuxuu xaq u leeyahay inuu diido baaritaanka neefta.

   a. Warqadda xuquuqda muwaadinka (PS 01802-09) waa in la akhriyaa ka hor inta aan la qaadin baaritaanka neefta.

   b. Haddii baaritaanka neefta la soo bandhigay oo la diiday, diidmada waxaa loo aqoonsanayaa dambi sida U sheegayo sharciga Minn. Stat. 169A.20, subd. 2.

2. Haddii Qaybta Baadhista Kiimikada la xidho, sarkaalku waxa uu isku dayi doonaa in uu helo Hawl-wadeenka DMT-G ga shahaada u haysto isagoo la xidhiidhaya MECC.

3. Waaranka baadhida waa in loo xafidaa baaritaanka dhiigga haddii:

   - Hawlwadeenka DMT-G ga oo shahaado haysta lama heli karo,
   - eedaysanaha caafimaad ahaan ma awoodo inuu qaato baarista neefta,
   - Eedaysanaha waxa uu bilaabay baadhista neefta laakiin waxa uu sheeganayaa in aanu jidh ahaan u dhamaystiri karin baadhista, ama
   - Caddayntu waxay muujinaysaa jiritaanka daroogooyinka aanan khamriga ahayn.

4. Eedaysanuhu waxa kale oo uu xaq u leeyahay in lagu sameeyo baadhitaano dheeraad ah oo uu sameeyo qof uu isagu rabo asagoo kharashkiisa baxsanaya inta uu xabsiga ku jiro.

   a. Sarkaalku waa inuu codsiga ku diiwaangeliyaa warbixinta CAPRS oo u oggolaado tuhmanaha inuu isticmaalo taleefoon si uu u sameeyo qabanqaabada baadhis kale ka hor inta aan loo gudbin Xabsiga Degmada Hennepin.

   b. Shaqaalaha jeelka waa in la ogeysiiyaa in qabanqaabada baadhis kale uu sameeyay qofka la xidhay.

   c. Baadhitaanka beddelka ah waxaa lagu qaadi doonaa xabsiga degmada Hennepin.

**B.** Qalab gaar ah ayaa laga helayaa qaybta baadhista kiimikada si loogu qaado dhiig.

1. Baadhista dhiigga waxa kaliya oo qaadi kara shaqaale caafimaad/cisbitaal oo u idman.

2. Dhiiga muunada waa in lagu calaamadiyaa meel ka baxsan sanduuqa qalabka oo ay ku qoran tahay kiis lambarka, shaybaarkana waa in lagu gelliyaa qaboojiyaha kiimikada.

**C.** Khabiirka Aqoonsiga Maandooriyaha (DRE) waa in loo yeedhaa marka uu sarkaalku rumaysto in uu qofku waday/ ku shaqaynayay gaadhi isaga oo ku sakhraansan maandooriyaha aan khamriga ahayn ama marka lagu daro khamriga.

1. Sarkaalka ama shaqaalaha Unugga Baadhista Kiimikada waa inay la xiriiraan MECC si ay u codsadaan DRE.

2. Haddii aan DRE laga helin magaalada, MECC waxay DRE ka codsan doontaa wakaalad kale (sida, Ilaalada Gobolka waddooyinka ee Minnesota ama Jaamacadda Minnesota).

3. Haddii DRE aan laga helin wakaalad kale, MECC waxay liiska dib-u wacidda Minneapolis kala xiriiri doonta DRE aan shaqada ku jirin si uu uga jawaabo

**D.** Dhammaan kiisaska, oo ay ku jiraan baaritaannada dhallinta, sarkaalka baaristu waa inuu sameeyaa waraysi muuqaal ah. Tani waxay duubis muuqaal ah ku dari doontaa akhrinta warqadda xuquuqda muwaadinka.

1. Kadib marka uu dhameeyo waraysiga muuqaalka ah iyo qiimaynta DRE (haddii la codsado), sarkaalku waa in uu dhamaystiraa habka aqoonsiga iyo:

   - Tikit ganaax sii oo u sii daa shakhsiga qof mas'uul ah; ama
   - Tikit ganaax ah sii oo u qaad shakhsiga xarunta sun-ka-saarista jirka; ama
   - U dhaadhici qofka Xarunta Dadka lagu hayo ee Degmada Hennepin
   - Haddii qiimeynta DRE la dhammeeyay iyo/ama muunada dhiigga ee laga qaaday DUI, codso Sii daynta Cabashada La sugayo (Release Pending Complaint (RPC). Markay buuxinayaan foomka Hay'adda xabiska, saraakiishu waa inay ku qoraan foomka "RPC - DRE Case
   - Foomamka qiimeynta DRE waxaa loo gudbin doonaa xafiiska Xeer Ilaaliyaha Magaalada Minneapolis. Tan waxa ku jira qiimaynaha qayb ahaan aan la dhamaystirin sababtoo ah qofka la xidhay oo diiday inuu dhameeyo qiimaynta.

**E.** Kala noqoshada shatiga darawalnimada

1. Dadka la xidhay ee diida baadhista ama dadka la xidhay ee qaata baadhista neefta .08 ama ka badan (.04 ama ka badan darawalka gaadhiga ganacsiga), sarkaalku waa inuu gooyaa geeska aan sawirka lahayn ee shatiga darawalnimada qofka si uu waxba kama jiraan uga dhigo mudnaanta darawalnimada. (11/08/16)

   a. Marka la jarayo shatiga, sarkaalku waa inuu xaqiijiyaa in dhammaan macluumaadka qeexitaanku ay yihiin kuwo sugan.

   b. Sarkaalku waa inuu buuxiyaa foomka Ogeysiiska iyo Amarka Ka noqoshada Gobolka (PS 31123-10) oo uu u soo celiyaa shatiga geesta laga gooyay qofka la xiray.

2. Hadii dhiiga kaliya laga qaado, sarkaalku waa inuu u soo celiyaa shatiga darawalka la xiray **isagoon ka jarin** shatiga. Waa mas'uuliyadda Waaxda Gawaarida ee Minnesota inay ku howlgasho natiijada baaritaanka.

3. Haddii qofka la xidhay uu haysto shatiga darawalnimada meel ka baxsan gobolka, **ha** gooyn shatiga. Sarkaalku waa inuu dhamaystiraa Ogeysiiska iyo Amarka Ka noqoshada Minnesota wuxuuna u soo celin doonaa shatiga qofka la xiray.

4. Foomka Ogeysiiska iyo Amarka Ka noqoshada Gobolka waa in sidoo kale loo buuxiyaa dadka la xiray ee aan haysan shatiga darawalnimada, si kastaba ha ahaatee sarkaalku waa in uu ku qoraa " **Ma aha shatiga** " ee foomka dushiisa.

5. Dhammaan kiisaska, nuqulka ugu sarreeya ee asalka ah ee Ogeysiiska waa in la siiyaa qofka la xiray, nuqullada soo harayna waxaa lagu tagi doonaa Unugga Baaritaanka Kiimikada oo ay la socdaan dhammaan waraaqaha kale ee la xiriira. Shaqaalaha Unugga Baadhista Kiimikada ayaa warqadaha u gudbin doona Unugga Diiwaangelinta.